

Alberta ayaa ka dhamaanaya tallaalka KOOFID-19

Janaayo 18, 2021 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Gudoomiye Jason Kenney wuxuu soo saaray bayaanka soo socda ee talaalka Alberta:

“Adeegyada Caafimaadka ee Alberta waxay ku dhowaad 90,000 qiyaasood siisay ilaa maanta shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee u qalma iyo shaqaalaha iyo dadka deegaanka ee sii wadaya daryeelka ee ku hareeraysan gobolka. Waxaan sii wadeynaa inaan ku hogaamino gobolada balaaran tallaalka KOOFID-19. Kani waa hadal wanaagsan.

“Waxaan sidoo kale ku faraxsanahay inaan sheego in talaalka ugu horeeyey ee lagu talaalay dhamaan 357 oo loo qoondeeyey goobaha ku yaala gobolka ee lagu daryeelo nolosha mudada dheer.

“Si kastaba ha yeeshee, khalkhalka sahayda ee lama filaanka ah ee dowladda dhexe ay ku dhawaaqday todobaadkii hore, Alberta ma lahaan doonto qiyaaso kale oo tallaalka ah oo ay heli karto si ay ugu maamusho qiyaasyada ugu horreyey ee galinka dambe maanta ama gelinka hore berrito.

“Sidaas awgeed, ma jiri doonto ballamo hor leh cusub ee qaadashada qiyaasta tallaalka oo la qaadi doono qaar ka mid ah ballamaha ugu horreeya ee hore loo sii ballansadeena dib ayaa loo dhigi doonaa maalmaha soo socda si loo helo sahay kooban. Qiyaaso ayaa loo qoondeeyay si loo hubiyo in qiyaasaha labaad loo heli karo ballamo go'an.

“Sidaan horey u sheegay dhowr jeer in tallaalka lagu tallaalayo garbaha dadyowga reer alberta iney xadidanyihiin toro inta gacanteena ku jiraan tan iyo markii aan soo saarnay tallaalkadeena, awoodana aan u leenahay inaan helno talaalka loo baahan yahay. Waa wax laga xumaado in la arko tan oo kale iyadoo dalal kale, sida Mareykanka, Boqortooyada Ingiriiska, iyo Israel ay heleen tallaalko aad u tiro badan.

“Aad ayaan uga xumahay xaalada aan hada wajaheyno. Wararka Janaayo 15 ee rarka Pfizer la jari doono 20 ilaa 80 boqolkiiba

Xogta la xiriirta

[Daawo shirka warfaafinta](#)

[Eeg sawirrada shirka jaraa'id](#) (waxaa la heli doonaa dhacdada kadib)

[Watch the news conference](#)

[View photos from the news conference](#)

Weydiimaha warbaahinta

Christine Myatt

780-446-2179

Agaasime Kuxigeenka Isgaarsiinta / Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

todobaadyada soo socda kaliya waxay sii kordhineysaa jahwareerkeena waxaana loola jeedaa inaan si weyn hoos ugu dhigno qorshaheena talaalka.

“Hadda Alberta waxay awood u leedahay inay bixiso 50 kun oo qiyaas ah usbuuciiba. Bisha Maarso, waxaan rajeyneynaa inaan awood u heli doonaa inaan maamulno 200,000 oo qiyaas usbuuciiba. Laakiin ma hayno sahay tallaalkaan isku mid ka dhigno. Nasiib darro, tani waxay ka dhigan tahay in tallaalkii qorshaysanaa ee (Dadkii Hore First Nations) iyo Métis iyo dadka waayeelka ah ee ka weyn da'da 75 la hakiyay.

“Waxaan rabaa inaan u xaqiijiyo reer Alberta in kasta oo dib u dhacani jiro, waxaan ku sii jirnaa booskii aan isla markiiba ku soo kaban lahayn uguna soo laaban lahayn diiwaangelinta nambardada tallaalka marba haddii la keeno qiyaaso ku filan. Wali kama niyad jabin dadaalkeena aan ku doonayno inaan ku tallaalno kuwa aadka ugu baahan.”